# Guurka iyo Furiinka Muhaajiriinta reer Minnesota

Immigrants, Marriage and Divorce in Minnesota

## Si sharci ah ma u guursaday mise u furay wax?

Guurka iyo furiinku waa wax shakhsiyan ah oo labo qof u dhaxeeya laakiin waxaa jira sharciyo ku saabsan waxa loo tixgeliyo guurka ama furiinka "sharciyeyan." In qofka guurkiisu jiro iyo kale kolka dowladu ay eegto waxa ay ku xiran tahay sharciyada wadan walba u gaarka ah. Gobol walba oo ka mid ah wadankan United States iyo wadan walba oo aduunka ku yaal waxa uu leeyahay xeerar u gaar ah oo ku saabsan sida la isu guursado ama la isu furo.

Wadamo badan, guurka waa in la diiwaan geliyaa ama dowlada ayaa laga sharciyeeyaa. Wadamo qaarkoodna, dowladu shaqo kuma leh nidaamyada guurka. Hadii aad u guursato si waafaqsan sharciyada wadanka ama gobolka uu guurku ka dhacay, kolkaa, waxa aad u guursatay si sharci ah xataa hadii aad u guurto wadan kale ama gobol kale.

Hadii aad qofka kale isu furteen si waafaqsan sharciyada wadanka ama gobolka uu furiinku ka dhacay, kolkaa furiinku si sharci ah ayuu u dhacay.

## Laanta socdaalku maxay u tixgelisaa guur ama furiin sharci ah?

Sida uu dhigayo sharciga laanta socdaalka ee Mareykanku (U.S.), hadii aad guursatay ka hor intii aadan imaanka wadanka United States, guurkaagana laga aqoonsadaa meeshii uu ka dhacay kolkaa guurkaaga waa in laga aqoonsado wadanka United States.



Tusaale ahaan: Hadii wadanka aad ku guursatay uu yiraa guurka diinta la isku guursadaa waa guur la aqoonsan yahay aadna kolkaa aad ku guursato diintaada, kolkaa Mareykanku (U.S.) waxa u badan tahay inuu aqbali guurka.

Mareykanka (U.S.) waxaa aad isqabi kartaan 1 qof markiiba. Xataa hadii ay sharci ahayn inaad isqabi in ka badan 1 qof markiiba (guur badan) meeshii aad ku guursatay, Mareykanku (U.S.) ma aqoonsado taa. Kaliya, guurka koowaad ayaa sharci ah Mareykanka (U.S.).

**Ogow:** Hadii laanta socdaalku ay kuu tixgeliso inaad qof isqabtaan, kolkaa sidoo kale waxa ay kuu arki inaad qof isqabtaan sharciga Minnesota iyo kan United States ku.

## Waa maxay guurka ama furiinka sharciga ahi ee wadanka United States?


Wadanka United States, guurku waa sharci kolka aad ka codsato dowlada warqad nikaax ka dibna aad qabato xaflad meher oo u hogaansanta xeerarka cayiman.

Gobolka Minnesota waxa aad ka codsan warqada nikaaxa degmada. Ka dib kolka aad hesho shatiga guurka, waa inuu isku kiin nikaaxaa qof la ogol yahay inuu nikaax sameyn karo.  waxa aad warqadda nikaaxa ka heli maamulka degmadda.

Hadii uu nikaaxa uu sameeyo qof loo ogol yahay inuu sameyn karo, oo raacaya nidaamka caqiidadaada, laakiin AAN shati guur haysan, waxaa dhici karta in kolkaa in aadan si sharci ah ugu guursan Minnesota.

Badanaa furiinku sharci ma ah hadii aan labada qof ee is furaysaa aysan maxkamad wada tagin. Warqado ayaa laga xareystaa maxkamada caadiyana labada qof oo is furaysaa waa khasab inay la kulmaan xaakim, Xaakimka waxa uu saxiixaa foom oranaya waa aad is furteen.

Maadaama gobol walbaa uu leeyahay sharciyo ka duwan kuwa gobolada kale oo u gooni ah, guurka ama furiinku waa inuu u hogaansamaa sharciyada gobolka meherka ama furiinku ka dhacay.




## Waa maxay sababta ay muhiimka u tahay inaan si sharci ah wax u guursado ama wax u furo?

Waa u muhiim xareynta canshuurta ama buuxinta wixii foomam ah ee ku waydiiya inaad cid isqabtaan iyo in kale. Ma oran kartid guur ayaa jira haddii dowladdu aysan aqoonsanayn guurkaaga. Sidoo kale waa muhiim hadii aad go'aansato inaad furto xilahaaga.

Guurka sharciga ahi waxa uu muhiim u yahay kala dhaxlida hantida. Hadii xilahaagu uu dhinto isaga oo aan dardaarmin, adiga aad dhaxlaya wixii hanti ah ee uu ka dhinto qofkaasi. Hadii aydaan isqabin, waxaa dhici karta inaadan wax xaq ah ku yeelan hantida qofku ka dhintay, xataa hadii qofkaa aad wada joogteen muddo dheer.

Hayshada ilmahu waxa ay ku xirnaan kartaa in waalidku ay si sharci ah isku qabeen iyo in kale kolkii uu ilmahu dhashay. Gobolka Minnesota, hadii waalidku aysan isqabin kolkii ilmahu uu dhashay, kaliya hooyada ilmaha dhashay ayaa ilmaha haysan karta hadii aan maxkamadi amrin wax taa ka duwan.

Hadii aadan hubin inaad u guursatay sida sharciga ah ee ay qabaan sharciyada Minnesota, la hadal qareen ka hor inta aadan xareysan canshuur ama aadan buuxin foomam lagu qorayo inaad cid isqabtaan.

## Sidee ayaan si sharci ah ugu guursadaa Minnesota?

Si aad si sharci ah ugu guursato Minnesota waa khasab inaad u hogaansanto xeerar cayiman. Waxa aad u baahan tahay:

- inaad ugu yaraan 18-sanno jir tahay
- aad awoodo inaad naftaada go'aano u gaari karto

- dalbo helna warqadda nikaaxa
- uu nikaaxa sameeyo qof loo ogol yahay inuu dad isku nikaaxin karo.

**Ogow:** Minnesota ma aqoonsato guurarka dadka aan qaan gaarka ahayn ee gobolka kale ugu safra si ay u soo guursadaan.

Ka dib kolka xeerarkaas oo dhan laga soo baxo, waxa aad heli kartaa warqada nikaaxa

Eeg warqadayada xogta aruursan ee *Guurka Minnesota*.

Gobolada qaarkood waxa ay leeyihiin sharciyo oranaya labada qofi waa ay isqabaan hadiiba ay wada noolaayeen muddo cayiman. Kuwaa badanaa waxaa loogu yeeraa guurarka xeerarka guud. Minnesota **ma ay** laha guurka xeerarka guud mana ay aqoonsana. Hadii aad wada noolaydeen sannado badan, aadna dadka ku tiraahdaan waa aanu isqabnaa, ka taxadata taa! Isma qabtaan sida u dhigayo sharciga Minnesota ilaa iyo inta aad raacaysaan sharciyada Minnesota ee warqada nikaaxa iyo xaflada meherka.

## Ma u baahanahay inaad si sharci ah wax u furo?

Hadii guurkaagu uu sharci ka ahaa meesha uu dhacay meherku, kolkaa dowlada Mareykanku (U.S.) waxa ay u aqoonsan tahay in guurkaagu uu yahay mid sharci ah. Haddii aad furiin rabto, waa inaad u heshaa furiinkaa si sharci ah.

Hadii uu meherku **ka** dhacay Minnesota, aadana u hogaansantay xeerarka diintaada ama dhaqankaaga laakiin aadan codsan warqada nikaaxa, kolkaa guurkaaga looma arko inuu yahay mid sharci ah. Ma **aha** inaad maxkamad tagto si aad wax u furto waayo gobolku idiinma uu arko inaad si sharci ah isu guursateen.



## Sidee ayaan si sharci ah qof ugu furaa?

Si aad si sharci ah qof ugu furto gobolka Minnesota waa inaad tagto maxkamadda degmadda aad ku nooshahay. Buuxi dukumiintiga macruufka ah ee la yiraa Arji. Arjigu waxa uu yiraa waxaa jiray "burburka aad wax laga qaban karin" oo guurka ah. Taa macnaheedu waa in adiga iyo xilahaagu aydnaan u wada noolaan karaan sidii dad isqaba oo kale mana jiraan wax rajo ah oo laga qabo in dib loo wada noolaado mustaqbalka.

Maadaama Minnesota ay leedahay waxa la yiraa furiinta aan cidna eeda la saarin, khasab kuma aha inaad cadeyso in adiga ama xilhaagu uu leeyahay khaladka guurka uusan u shaqeynayn.

Hadii aad doonayso inaad codsato furiin adigoo Minnesota jooga, waa khasab inaad ku noolayd Minnesota 180 cisho. Waa inaad ka xareysato warqadaha furiinka degmada aad adigu ama xilahaagu uu ku nool yahay.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**